

THE STATE EDUCATION DEPARTMENT /
THE UNIVERSITY OF THE STATE OF NEW YORK / **ALBANY, NY 12234**
Office of Bilingual Education and World Languages

55 Hanson Place, Room 594
Brooklyn, New York 11217
Tel: 718-722-2445 Fax: 718-722-2459

89 Washington Avenue, Room 528EB
Albany, New York 12234
Tel: 518-474-8775 Fax: 518-474-7948

**XUQUUQDA BIILKA WAALIDIINTA EE BARTAYAASHA LUUQADA
INGIRIISKA EE GOBOLKA NEW YORK**

Waxda Waxbarashada ee Gobolka New York (NYSED) Guddoomiyaha Sharciyada Qeybta 154 waxay ku siisaa adiga – waalidiinta/masuulada ee Bartayaasha Luuqada Ingiriiska (ELL) - iyo:

1. Xaquuqda carruurtaada inay helaan waxbarashada dadweynaha oo lacag la'aan ah ee dugsi degmada ee meesha aad ku nooshahay, iyadoo aan laga eegin xaaladaada socdaalka ama carruurta (tusaale ahaan, haddii xubnaha qo2.6 (nt)-6 a6(ada))TJ 0 -1.152e1gdhada dadhEe43.5 ~~u~~sharci yihiin) iyo luuqada aad adiga ama carruurtaada ku hadashaan.
2. Xaquuqda aad leedahay aad carruurtaada uga diiwaangelisid dugsi iyada oo aan lagu weydiin in aad dhiibtid macluumaad ama waraaqaha muujin karo xaaladaada socdaalka ama carruurtaada. Ma lagu weydiin karo inaad keentid kaarka Amniga Bulshada ama Lambarka, fiisada socdaalka ama xaalada fiisaha, ama waraaqaha dhalashada ama xaalada dhalashada.
3. Xaqa sida waafaqsan sharciga federaalka in aad heshid turjumaan/fasire uqalma luuqada aad dooratay ee isdhexgalyada muhiimka ah iyo dugsi degmada .
4. Xaquuqda carruurtaada ay ku helayaan barnaamijka Waxbarashada Labada-luuqad (BE) marka ay jiraan heerka fasalka ardayga 20 ama ka weyn yihiin ardayda heerka fasalka oo ku hadlaan isku midka luuqada quriga/ koowaad. [1]
5. Xaquuqda ogeysiinta ku qoran oo af Ingiriis ah iyo luuqadaada aad doorbiday oo carruurtaada loo aqoonsaday sida ELLs oo waxaa lagu meeleynayaa Waxbarashada Labada-luuqad ama Ingiriiska sida barnaamijka Luuqada Cusub (oo horay loo yaqiinay Ingiriiska sida Luuqada Labaad). [2]
6. Xaquuqda fadhiga wacyigelinta tayada sare leh, oo ay bixiyaan dugsi degmadaada, tasoo diiradda saarta heerarka gobolka, imtixaanada, iyo filashooyinka dugsi ee ELLs, iyo sidoo kale sida hadafyada barnaamijka iyo shuruudaha Waxbarashada Labada-luuqad iyo Luuqad Cusub. Wacyigelinta waa in ay dhacdaa ka hor meeleynta ugu dambeeyo ee barnaamijka dugsi, oo waa in ay ahaadaan luuqada aad doorbiday.
7. Xaquuqda in aad hesho macluumaad oo ku saabsan hormarka luuqada Ingiriiska carruurtaada, iyo sidoo kale hormarka luuqada hooyo haddii ay ku jiraan barnaamijka Waxbarashada

8.

